

Qoraalka Fahanka:
Muraajacaynta Shahaadada-Dhexe
Statement of Understanding: Mid-Certification Review



Si aad usii heshid lacagta cadaanka ah ama caawimaada cuntada, waxaa kugu khasab ah in aad buuxisid Muraajacaynta Shahaadada- Dhexe. Waxaa jirta sedex wado oo aad u buuxin karto muraajacayntaada:

1. Taleefoonka adiga oo waca 1-877-501-2233.
2. Adiga oo buuxiya foomka DSHS 14-467 kadibna
 - Faakis noogu soo dira lambarkaan 1-888-338-7410; ama
 - Fariin noogu soo dira PO BOX 11699, TACOMA WA 98411.
3. Adiga oo noogu dul mara duruufahaaga hadda ah xafiiska gudaha, saxiixa, kadibna taariikh u sameeya foomkaan.

Waxa kugu khasabka ah in aad kusheegto Muraajacaynta Shahaadadaada- Dhexe:

- Bedelaad dhinaca cinwaanka ah iyo qiimooyinka gurigaada ee cinwaanka cusub.
- Isbedelada kusaabsan dadka kunool gurigaada.
- Isbedelada kusaabsan dakhliga gurigaada kasoo gala **il kasta**. Middaana waxaa kujira dakhliga kayimaada shaqada, magdhowka qofka aan shaqaynin, dammaanada bulshada, Shaqo iyo Warshado, iyo caawimaada cunuga.
- Isbedelada kudhaca midkasta oo caawimaada cunuga ah middaas oo si sharci ah lagaaga baahanyahay in aad u bixisid ilmaha aadan la noolayn.
- Haddii aadan ilmo kuhaysan gurigaaga, hoos ayay usoo dhacaysaa saacada shaqada qofka-jirkiisu awoodo wax kayar 20 saacadood todobaadkii.

Si taxadar leh u akhri kadibna saxiix kahor inta aadan soo celin foomkaan:

- Waan fahmayaa qaanuunyada DSHS ay iiga baahantahay si aan u buuxiyo Muraajacaynta Shahaadadaan-Dhexe kadibna u sheego DSHS waxyaabaha kusaabsan Isbedelada duruufaha gurigayga sida waafaqsan WAC 388-418-0005 iyo WAC 388-418-0011.
- Waan fahmayaa oo waan garanayaa in ay denbi igu tahay in aan been sheego si aan u hello lacag cadaan ah ama faa'idooyin cunto ah. Sidoo kale waxaan fahmayaa in ay denbi tahay haddii aanan u sheegin DSHS wax aan garanayo ama aan ogahay taas oo khasab igu tahay in aan sheego.
- Waan fahmayaa in haddii aan bixiyo macluumaad aan ogahay in ay khalad tahay, la igu dacweynayo denbi.
- Waan fahmayaa ciqaabaha ka imaan kara jebinta qaanuunyada caawimaada cuntada ay kujirto noqoshada u qalmid la'aanta hellida caawimaad cunto, ganaaxyada, ama xabsi.
- Waan fahmayaa in haddii aanan bixin daliil ama cadayn kusaabsan isbedelada taas oo kadhigi karta faa'idooyinkayga in ay kor u kacaan, DSHS ma isticmaalayso isbedeladan si ay u xadido faa'idooyinkayga.
- Waan fahmayaa in waxyaabaha aan ugu sheegay qaybta waribixintaan gudaheeda ay saamayn karto faa'idooyinkayga.
- Waxaan kucadaynayaa ciqaabta hoos imaanaysa been sheegida in macluumaadaan aan ugu sheegay DSHS warbixintaan gudaheeda ay tahay mid run ah oo sax ah inta aan ogahay.

SAXIIXA	TAARIIKHDA	MAGACA LADAABACAY	LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA
---------	------------	-------------------	---------------------------------

